

**Guddiga Maamulka Maaliyadda: Hadalqoraalka kulanka oo kooban
Kulanka 51aad ee 30ka Maarso 2021**

Arrimaha Maaliyadda: Shir Gudoomiyaha ayaa ku wargaliyay kulanka in ayadoo ay jirto saameynta caabuqa COVID-19 ay Dowladdu aad ugu dhowdahay inay gaarto bartilmaameedkeeda dakhli uruurinta seddex biloodlaha hore ee maaliyad sanadeedka, iyada sidoo kale laga fogaanayo deyn cusub. Balse, cadaadiska maaliyadeed ayaa weli ah mid xoogan, maadaama ay meesha ka maqnan tahay taageerada miisaaniyadda deeq-bixiyeyaasha.

Siyaasadda Maamulka Maaliyadda: Waxaa kulanka looga hadlay talo bixin uu soo diyaariyay Guddiga Maamulka Maaliyadda oo ku saabsan sare u qaadidda ururinta canshuuraha isgaarsiinta. Wasaaradda Maaliyadda waxay soo dhawaysay tilmaamaha Guddiga Maamulka Maaliyadda, waxayna sheegtay in Dowladdu ay ka go'an tahay maalgalinta kaabayaasha lagama maarmaanka ah iyo awoodda canshuur uruurinta, si loo kordhiyo heerka dakhliga isgaarsiinta. Guddiga Maamulka Maaliyadda waxuu kaloo ka hadlay dalabka tartanka ee soo ururinta deymaha ururay ee dakliga ka soo xarooda isticmaalka hawada Soomaaliya.

Arrimaha Batroolka iyo Gaaska: Kulanka ayaa looga hadlay natiijooyinka ka soo baxay fikrad sharciyeed madax banaan oo ku saabsan ku dabaqidda Sharciga libka Qaranka qandaraasyada batroolka, kaasi oo lagu soo koobay Qoraalka La-talinta Guddiga Maamulka Maaliyadda. Aragtida sharciga ah waxay soo bandhigtay in Sharciga libka Qaranka iyo Sharciga Batroolka lagu wada dabaqi karo bixinta heshiisyada wadaagga wax soo saarka batroolka, iyadoon midba midka kale khilaafsanayn. Shir Gudoomiyuhu wuxuu soo dhoweeyey la talinta sharciga wuxuuna ku celceliyey inaanay jiri doonin gorgortan heshiis batrool ama bixin heshiis wadaag wax soo saar, ilaa iyo inta laga dhamaystirayo shuruudaha maaliyadeed, lana waafajinayo Sharciga Canshuuraha Dakhliga Soo-saarista Macdanta iyo dhammaan shuruudaha sharciga, oo ay ku jirto oggolaanshaha Guddiga Wasaaradaha ee Qandaraasyada.

Bankiga Dhexe iyo Arimaha Dhaqaalaha: Gudoomiyaha Bankiga Dhexe ayaa warbixin ku saabsan dadaalada dib-u-soo-celinta hantida qaranka iyo horumarka laga sameeyay dhanka soo-celinta hantidii taalay Bankiyada Talyaaniga ku soo gudbiyay kulanka. Bankiga dhexe ee Soomaaliya waxuu sii wadaa bixinta rukhsadaha shirkadaha ka shaqeeya lacagaha la isugu diro taleefoonnada gacanta. Bankiga ayaa hore u bixiyay hal shati, waxuuna hada ku guda jiraa qiimeynta codsiyada laba shirkadood oo kale si shati loo siiyo. Sidoo kale, si loo xoojiyo nidaamyada maaliyadeed ee dalka, Bankiga Dhexe waxuu ka shaqeynayaa howlo muhiim ah oo ay ka mid yihiin nidaamka lacag bixinta qaranka iyo mashruuca sarifka lacagaha Soomaaliya.

Heshiisyada iyo Qandaraasyada: Kulanka ayaa looga hadlay sidii loo heli lahaa khubaro iyo taageero dhanka farsamada ah oo lagu taageerayo hannaanka qandaraaska baasaboorka. Guddiga Maamulka Maaliyadda ayaa Wasaaradda Maaliyadda Federaalka ugu hambalyeeyay dhamaytirka tartankii qandaraasyada raashinka ee Ciidanka Xoogga Dalka, Booliska iyo Asluubta.